

Horumarinta Qiimeynta Dhamaan Heerarka (Maamulka Wax-qabadka)

Dul-marka Guud

Howlqabad sare, hay'addaha samafalka, hay'addaha dowlada iyo shirkadaha waxaynu balanqaadeynaa in aynu sii wadeyno qaabka haajinta, Waxayna inoo cadeeyeen rajada sare ay naga sugayaan iyo qalabka horumarinta qiimeynta. Waxay horay inoogu qeexayn goobaha aynu ku liidano, bixinta cawinaada; waxayna aqoosadayn dadaalkeena fiican in aynu siidano si u madax-banaan ah. Guulaha waxaa lagu gaarayaa qaabka maamulka wax-qabad leh tayo sare dhamaan heerarka oo dhan.

Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxay balanqaadayaan in ay isticmaalayno horumarka qaabka maamulka wax-qabadka si aynu u hubino arday kastaba dugsiiga ee degmada ay leeyihiin ahmiyad iyo mas'uuliyad isku mid ah. Maamulka degmadda waxay soo bandhigaynaa qaabka horumarka qaybaha wax-qabadka iyo hubinta fulitaanka lixda bilood oo soo socoto.

Qodobada Muhiimka ah

Waxaa jira qaybo fara badan aynu ahmiyada-saareeyno sanadkaan.

Qeexitaanka Ujeedooyin Cad – Qaybahaan waxay sal-dhig u yihiin qodobada aynu ka mas'uulka yihiin sida ardayda dugsiiga ugu guulaysan lahaayeen. Degmadda waxay ahmiyad siineysaa marka hore ujeedooyin tiro yar dhamaan heerarka ardayda, waxayna balanqaadayaan in ay ka shaqeeyaan sida ay isugu xiri lahaayeen ujeedooyinkaas. Qaybaha kale ee qaabka maamulka wax-qabadka way daba socdaan.

Soo Horumarinta Khariidad Sare – Khariidada sare waa heerka ugu sareeyo oo lagu kormeeraayo qodobada heerka xeelada muhiimka ah ee barnaamijka iyo habka shaqada lagu fiirinaayo horumarka. Qaabkaan wuxuu inoo horseedayaa gaaritaanka ujeedooyinkayna. - Waxaynu sameenayaa waxa aynu ku dhawaaqno si barnaamijka oo waxtar u yeesho. Mararka qaarkood waxaa loo tixraacayaa tilmaan-bixinta qodobada wax-qabadka muhiimka ah "Key Performance Indicators (KPIs)". Waxaynu xooga-saaraynaa labada qaybood bilaawga howlaha hore ee khariidada sare:

- Xarunta Dhexe khariidada sare – habka xarunta dhexe u fuliyaan hogaaminta qorshaha xeeladaha iyo fulinta arimaha khuseeyo natiijooyinka go'aanada ay soo bandhigaan dib-u-habeeynta dibadda. Waxaynu ka bilaaweynaa howl fulinta seddexda qaybood ugu muhiimsan (IT farsamada casriya, HR hay'adda shaqaalaynta, dhaqaalaha) isla markaana waafaqsan hay'adda cilmiga aqoonta.
- Agaasimaha Guud Khariidada Sare – maxay tahay ahmiyada-koowaad Agaasimaha Guud oo ku hubinaayo fulinta guul gaarida waxbarashada degmadda iyo sidee ay ku qiimaynaayo horumarka qorshahaan.

Hirgalinta Qaab-Dhismeedka Wax-qabadka Dugsiiga – Inta badan dugsiyada waxay ku guulaysteen waxbarashada laakiin dugsi kastaba wuxuu u baahan yahay hagaajin. Hirgalinta qaab-dhismeedka wax-qabadka dugsiiga, waxaa lagu cadeeynayaa dugsi kastabada halka oo ku fiican yahay iyo halka ugu baahan yahay cawinaada, gargaarka dugsiiga la siinaayo waxay ku xiran tahay xaaladaha oo dugsiiga ku sugan yahay. Waxaynu si gaar ah ula shaqayneeynaa macalimiinta, maamulayaasha dugsiyada iyo shaqaalaha kale si loo soo bandhigo horumarint ku saleysan macluumaadka sanad dugsiyeedka 2008-09, taas waxay u sii hogaysaa aqoonta sanad dugsiyeedka 2009 -10.

Su'aaladaha Ururada

- Maxaa rabtaa in aad si fiican u barato?
- Maxaa kuu cadeeyn?
- Maxaa anaga naga maqan?
- Sidee baa u jeceshahay in laugu siiyo akhbaaraha aad ugu qaybgalaysa shaqadaan?